



Waxbarasho Wadajir Ah Tallaabo Kasta oo La Qaado

MAGAALADA TORONTO | KOOXDA ADEEGGA CARRUUNIMADA HORE: COMMUNITY LIVING TORONTO | XARUNTA
MEESHA SURREY (SURREY PLACE CENTRE)

XAAISHI TILMAAN-BIXINEED

Hannaanka Kala Horreysiinta Xirashada Saraawiisha

Carruur fara badan ayaa u baahan taageero markay baranayaan xirfad cusub. In loo kala qaado xirfad tallaaboooyin aad u yarna waxay ilmaha ka caawin kartaa inuu barto halkii marba hal tallaabo. Tiro ahaan inta tallaabo oo xirfad ama hawl loo kala qaadayana waxay ku xiran tahay baahida ilmahaaga.

Waxaa suurtagal inaad siiso ilmahaaga nidaam muuqaal ah oo kala horreeya. Taasina asal ahaan waxa weeye sawirro taxane ah oo ku tusinaaya tallaabooyinka laga maarmaanka u ah in la dhammaystiro hawl. Wuxaanad isticmaali kartaa sawirro dhab ah, sawiro xarijin ah, ama astaamo sawirro ah. Marka aad isticmaalayso nidaam muuqaal ah oo kala horreeya, ku dheji meel la siman aragtida indhaha ilmahaaga, fartana ku fiiq sawirka, oo akhri

tallaabada ka hor intaadan dhammaystirin hawsha adigoo adeegsanaya cod aad u sarreeya.

Waxaa kale oo aad isticmaali kartaa sawirrada si aad u samaysato ciyaar adiga kuu gooni ah oo leh nidaam kala horreeya. Si hawl yari ahna u daabaco sawirrada, kana jar meeshay ku yaallaan, ilmahaaguna haku tababbarto asagoo tallaabooyinku siday isugu xigaan u kala hormarinaya. Waxaa kale oo aad samayn kartaa ciyaar wax la is-waafaqsiiyo adigoo labo nuqul (koobi) ka samaynaya hannaanka ay wax isugu xigaan. Si isku mid ahna ugu dheji hal nuqul xaanshida dhismaha (construction paper) nuqulka kalena ha isticmaalo ilmahaagu si uu isu waafaqsiiyo isulana doonto kaararka isku midka ah.

Hannaanka Kala Horreysiinta Xirashada Saraawiisha, waa socotaa

**Halkan waxa ah tusaale muujinaya hanaanka kala horreysiinta ‘xirashada laba surwaal’
lana isticmaalo marka la joogo guriga:**


Qabso
surwaalka



Fur Cinjirka
dhexda



Dhexgeli lugta midig
daloolka midig ee
surwaalka



Dhexgeli lugta bidix
daloolka bidix ee
surwaalka



Hannaanka Kala Horreysiinta Xirashada Saraawiisha, waa socotaa

Sare usoo qabo lugta
bidix ee surwaalka si
lugta bidix aad u geliso



Sare uga soo qabo
surwaalka cinjirka
dhexda.*



* F.G: Min 1 sano ilaa 6 sano, ilmaha waa la fariisin karaa; 7 sano iyo ka badanna wuu taagan yahay